



HALKA MACLUUMAADKA AY KA HELLI KARAAN QOYSASKU

Marka la wacayo isbitaalka

When to call the hospital



Nambarka telefoonka isbitaalka:

Xasuuso, waxaan aaminsanahay ma jirto wax la yiraahdo su'aal qalad ah.

Wac isbitaalkaaga haddii aad welwel ka qabto wixii la xiriira waxyaallahan soo socda:

- Haddii xaraarada ilmahaagu ay tahay 38° C ama ka kor
- Ilmahaagu in aanu mar kasta dareemin ladnaan ama fiyoobi
- Mar kasta oo aad ka welwelsan tahay wixii la xiriira ilmahaaga
- Dhaxamaysan yahay oo gariirayo
- Hunqaaca siyaada ah ama shuban
- infakshan: guduudasho, danqasho ama xanuun ka haya jirka dhamaantiis
- taabashada busbus, jadeeco ama qaamaaqashiir
- nooc kasta oo dhiigbax ah, jug ama furuuruc
- daal aad siyaada u ah, qayirnaan ama neefsiga oo ku adag
- fuuqbax – kaadida oo ku yaraata, af-qalal
- xunuun: daran ama aan tegayn
- diidida cabitaanka
- candhuufada oo aanu laqayn
- Gafay qaadashada qadar daawa ah
- Hunqaacida in ka yar hal saac qaadashada daawada ka dib.



Australian & New Zealand
Childrens Haematology/Oncology Group

Mashruucani waa Deeqda Da'daalka Cancer Australia oo Caawimaya Dadka qaba Kansarka, waxaana kharajkiisa bixisay Xukuumada Australia



Australian Government
Cancer Australia